WESTERVILLE CITY SCHOOLS
All-Day Kindergarten

Qoysaska daggan xaafadaha Dugsiyada Magaalada Westerville waxay fursad u haystaan in ay magaca xanaanadooda geliyaan bakhtiyaa nasiib taasoo lagu ogaan doono meeleynta Xanaanada Maalinta Idil. Ilaa 430 arday ayaa buuxin doono kuraasta Maalinta-Idil ee 18 fasal, afar ka mid ah waxaa lagu qaban doonaa Dugsiga Hoose Longfello. 14ta fasal xigta waxaa lagu qaadan doonaa mid kasta oo ka mid ah dhismooyinka dugsiga hoose halkaas oo labo fasal lagu qaadan doono Alcott iyo Pointview.

Macluumaad Muhiim ah oo la xariira Xanaanada iyo Taariikhda

- Arjiiyada Xanaanada Maalinta-Idil waxaa la heli doonaa 5 p.m. maalinta Janaayo 29, 2019 taasoo qeyb ka ah arjiga dalabka diiwaan gelinta internetka lana dhamaystiro ugu dambayn bisha Maarso 29, 2019.
- Kharashka waxbarashada Xanaanada Maalinta-Idil waa $3,000 halkii sanno ama $300 bil kasta muddo 10 bilood. (Agoosto - Maajo). Kaalmada kharashka waxbarashada waxaa heli kara kuwa xaqa u yeesha. Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa bogga internetka www.wcsoh.org/ADK
- Haddii cunugaada uu gaaro shan sanno bisha Sateembar 30, 2019, waxaad isaga/iyada ku qori kartaa xanaanada Dugsiyada Magaalada Westerville.
- Diiwaan gelinta waxay bilaaban doontaa bisha Febraayo 4, 2019.
- Haddii aadan hubin dugsiga hoose uu cunugaada tagi doono taasoo ku xeran cinwaanka gurigaada, fadlan la xariir midka aad doonto dugsiyada hoose ama Xarunta Diiwaan Gelinta iyo Ilaha Qoyska (Enrollment & Family Resource Center), telefoonka 614-797-7700.
- Haddii cunugaada uu iminka ku qoran yahay Dugsiyada Magaalada Westerville ka hor inta uusan gaarin dugsiga ee ka jira ELC, looma baahna in aad dib isugu qortid, balse waxaad u baahan tahay in aad dhamaystirtid arjiga Xanaanada Maalinta-Idil.

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo

Da'dee ayuu cunugeyga/cunugteyda tagi kartaa Xanaanada Dugsiyada Magaalada Westerville?

Haddii cunugaada uu gaaro shan sanno marka la gaaro Sateembar 30 ama kaddib sannad dugsiyeedka soo socdo, waxaad isaga ama iyada ku qori kartaa xanaanada.

Si aan cunugeyga/cunugteyda ugu qoro xanaanada, ma inaan sugaa baa ilaa isaga/iyada ka gaarto lex sanno?

Haa, sharciga gobolka wuxuu rabaa in tagidda ay waajib ku tahay caruurta da'dooda u dhexeyso 6 sanno iyo 18 sanno.

Suurtogal miyaa in aan cunugeyga u codsado in uu "Waqti Hore Galo" haddii taariikhda dhallashadiisa ku beegan tahay bisha Sateembar 30, 2019 kaddib

Haddii cunugaada ka weyna yahay shan sanno marka la gaaro Sateembar 30, 2019 kaddib, balse aad adiga aaminsan tahay in isaga/iyada diyaar u tahay, fadlan la xariir Waaxdena Adeegyada Hibbada iyo Kartida (Gifted & Talented Services Department), telefoonka 614-797-5887 kaddibna kala hadal gelitaan hore.

Maxuu yahay kharashka ku baxa brograamka Xanaanada Maalinta-Idil?

Ugu yaraan, dugsiyada dagmada waxaa laga rabaa in ay ardaydooda u helaan xanaano lacag la'aan ah, maalinta barkeed. Fursadaan waxaa heli kara qof kasta. Qoysaska doorta in cunugooda lagu qoro Brograamka Xanaanada Maalinta Idil (All-Day Kindergarten Program) waxaa lagu soo dallici doonaa kharashka waxbarashada taasoo dheeraad ku ah khidmadda lagu bixiyo saadka caadiga dugsiga ee ardayda ku qoran xanaanada. Kharashka ku baxa waxbarashada oo buuxa waa $3,000 halkii arday, ama $300 bil kasta muddo 10 bilood.

Goormaa la rabaa in la bixiyo kharashka waxbarashada?

Lacag bixinta kowaad waxaa leyska rabaa marka cunugga laga ogolaado brograamka, taasoo loo xisaabi doono lacag bixinta bisha Agoosto. Bixinta kharashka waxbarashada waxaa leyska rabaa bisha Sateembar ilaa Maajo, kowda bil kasta. Qoysaska waxay fursad u haystaan in ay kharashka ku bixiyaan lacag caddaan ama jeeg ama in ay ka bixiyaan internetka siistemka EZPay.

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo

Ma jira qorsho loogu talogalay qosaska aan awoodin kharashka waxbarashada brograamka Xanaanada Maalinta-Idil?

Waxabarashada waxaa lagiu go'aamin doona iyada oo loo marayo codsiga Caawinta Waxbarashada. Haddii ay qoyskayga u qalmaan caawin, waxabarashada Dugsiga barbaarinta Maalinti- Oo dhan waxaa lagu saleyn doonaa dhakhliga guud iyada oo la isticmaala miisaanka lacagta kala saara. Fadlan arag codsiga Caawinta Waxbarasgada www.wcsoh.org/ADK wixii macluumaad ah waa laga heliya.

Waa maxay farqiga u dhaxeya brograamka Xanaanada maalin-barkeed iyo brograamka Xanaanada Maalinta-Idil? Labada ikhtiyaarod ma la heli karaa?

Manhajka waa isku mid labada barnaamijyada maalin-barkeeda iyo barnaamijka Dugsiga barbaarinta maalintii-oo dhan. Barnaamijka ADK waxa uu siiya macalimiinta waqti in ay fiiro dheeraad ah u sooci baahida shaqsiyeed kala duwan ee carruurta iyo in la kordhiyo xoojinta waxbarashada oo canug kasta. Waxaa jiro fursaddo weyne oo lagu barto farshaxanka luuqada, xisaabta cilmiga bulshada, sayniska iyo fanka iyada oo loo marayo mashruuca shaqada iyo waxbarashada kooxaha yar-yar maalin oo dhan.

Waxaa jira kuraas cayiman oo laga heli karo Barnaamijka ADK. Ikhtiyaarka maalin-barkeeda waa uu sii socon doonaa si ay u helan waadlidiinta degan Degmada Dugsiyada Magaalada Westerville .

Ardayda ku jirta brograamka Xanaanada Maalinta-Idil, dhaqso miyay u maraan manhajka marka la barbar dhigo ardayda ku jirta brograamka Xanaanada Maalinta-Barkeed taasoo siisa faa'ido badan marka loo fiiriyo ardayda Maalin-Barkeed?

Maya. Barnaamijka Dugsiga barbaarinta Maalintii Oo-dhan waxay u oggolaanaya macalinka inuuu waqti badan u ku bixiyo fakarka la baray. Ka soo qeybgalayasha Barnaamijka ADK si degdeg ah ma ugu dhaqaqin manhjaka, ma aysan ku degdegin manhajka fasalka kowaad inta wali lagu jiro Dugsiga barbaarinta .

Ardayda xaadirta Xanaaanada carruurta Maalinta-Barkeed noqon doonaa ka danbeeya ardayda dhigata barnaamijkaMaalinta-Barkeed ?

Dhamman ardayda waxay helayana Heraarka Qancinta Waxabarashada ee loo aqoonsaday sannad Dugsiyeedka carruurta. Carruurt yar-yar waxay dugsiga la yimadan waxbarsho kala duwan iyo wayo-araganimo. Wiilasha iyo Gabdhaha waxaa laga yaaba inay xaadireen barbarinta carruurta ama ay ku jireen goobta xaruunta carruurnimadda hore. Dad badan waxay layhiin wayo-aragnimo waxbarasho oo gaar ah oo ay ku jiran qoysaskooda, oo ay ku jiraan safarrada, booqashada maktabadda, isdhexgalka qoyska ballaran iyo gaarista in qalabka akhriska iyo qoraalka ee guriga. Waxay ku jirta wayo-aragmnimada taas oo inay dejinaysaa heerka waxbarasho. Macalimiinta Dugsiga barbaarinta waxay la shaqayaan wiilasha iyo gabdhaha sida ay tahay baahidooda iyo awoodooda.

Ma la heli karaa lacag soo celinta ardayda Dugsiga barbaarinta Maalintii-Oo Dhan?

Lacag soo celinta waxaa laga yaaba ina la sameeyo ilaa iyo Ogosto 1 haddii loo keeno cadeyn buuxda ka sarista. Marka ay fasallada bilaabmaan, qiimaynta-hordhac ee lacag soo celinta ayaa la sameyn doonaa.

Sidee ayaa looga shaaqeyn doonaa Brograamka Xanaanada Maalinta-Idil?

Haddii xaqiiqada lagu siiyo waxaa jiro kursayo xadidan oo laga heli karo barnaamijka Dugsiga barbarinta carruurta Maalitiin oo dhan, oggolaanshaha barnaamijka waxaa lagu go'aamiya qaabka baqtiyanasiib. Isdiiwaangelinta dhamman ardayda Dugsiga barbaarinta waxay dhici doontaa Febaraayo, xiligaas oo ay qoysaska awooodan inay ku dhammaytiraan codsiga khadka furan ee Barnaamijka Baqtiyaasaniib ADK. Dhamman ardayda laga diiwaangeliyay Dugsiyada Magaalada Westerville oo ay dhammaystiran yihiin codsaiyadooda waxaa la helaya mudada kama dambaysta Maarso 29 waxay ka gali doonaan baqtiyaa nasiib. Waaldiinta waxaa laga soo ogeysiin doonaa natiijooyinka baqtiyaa nasiibka Abriil.

Maxay yahiin hababka la raaco haddii cunugga ku sugan yahay liiska sugitaanka brograamka Xanaanada Maalinta-Idil.

Kaddib marka laga shaqeeyo arjiyada xulashada kowaad, casumaadyo ayaa email loogu diri doonaa xulashada labaad qoyska taasoo ku saleysan nambarka bakhtiyaa nasiibka.

Weli ma dalban karaa brograamka Xanaanada Maalinta-Idil haddii aan gaffo waqtiga kama dambayska?

Waa la ogolaan doonaa arjiyada lala soo daaho. Haddii ay soo haraan ama la heli karo kaddib marka la soo gabogabeeyo bakhtiyaa nasiibka, boosaska waxaa la buuxin doonaa boosaska taariikhda la qabtay arjiga cusub.

Xulashada ardayga Xanaanada Maalinta-Idil ma kala duwan tahay marka laga hadlo walaalaha badan ama kuwas isku da'da ah?

Haa. Waalidiinta waa in ay dhamaystiraan soona gudbiyaan hal arjiga Xanaanada Maalinta-Idil iyaga oo adeegsada mid ka mid ah magacyada caruurtooda. Arjiga waxaa laga helaa meel ay waalidiinta ku muujin karaan waxay ay jecel yahiin si ay kuwooda badan meel isugu geeyaan ama fasalo kala gaar ah. Waa la soo dhaweyaa jeclaanta waalidka u qabo in uu meel isugu geeyo caruurta marka ay suurtogal tahay taasoo ugu wacan kuraasta la heli karo oo kooban

Haddii cungeyga u tago Xanaanada Maalinta-Idil ee laga helo mid ka mid ah dugsiyada hoose ee marti geliya brograamka, taasi ma waxay noqon doontaa dugsigena xaafadda darajooyinka 1-5?

Maya.Qoysaska aqabalaya kursiga barnaamijka Dugsiga barbaarinta ayaa loo oggolaan doonaa inay carruurtood u diraan dhanka kasta oo lagu qababanayo barnaamijka, iyada oo la fahamsan yahay dhinacas la doortay inaysan noqonin "guriga dugsiga" ee ardayda cusub. Markii loo gubo fasalka koowaad, aradyada ka qeybgasha barnaamijka ADK waxay noqon doonaan dugsiga hoose ee ay xaadiran oo ku saleysan cinwaanka guirga. Sidoo kale haddii ardayda dugsiga u xaadirayo u yahay dhinca barnaamijka ADK, waxaa kaliya oo ay ku eekaanayaan fasallada duggsigaas hoose 1-5.

Ma heli doonaan gaadiid ardayda Xanaanada Maalinta-Idil?

Ardayda aqbashay Dugsiga barbaarinta maalintii-oo dhan kuwaas oo doortay inay xaadiran dhinaca Dugsiga hoosee ee Longfellow ama dugsigooda xaafada ee ay xaadirayaan ayaa heli doonaa gaadiidka. Gaadiidka sidoo kale la siin doonaa ardayda Alcott degan Fouse iyo Robert Frost ka qeybgalayaashan meelaha iyo ardayda Pointview ku nolool Huber Ridge iyo ka qeybgalashan meelaha Wilder. Haddii la doorto dhisma kale, waalidka waa inuu ahaad gaadidka. Gaadiidka dugsi kale oo aan ahayn dugsiga guriga ee ilmaha ku lug yeelan doontaa kala wareejinta wadada baska.

Ma heli doonaan qado ardayda Xanaanada Maalinta-Idil?

Ardayda Dugsiga barbaarinta Maalintii-Oo dhan waxay awoodan inay iibsadan qado dugsiga ama waxaa laga ayaab a inay keendasadan qado.

Maxay yahiin bilowga iyo dhammadka waqtiyada Xanaanada Maalinta-Idil?

Ardayda waxay ku jiran xiisad laga bilaabo 9:05 a.m. ilaa iyo 3:30 p.m.

Ma siisaa carruurta daryeel ka hor iyo kaddib dugsiga?

YWCA meesha carruurta, waxaa laga heli karaa dugsiga kaddib iyo ka hor dhamman dhisamyaasheena dugsiga hoose. Kani waa barnaamij ku saleysan-laacag la'aan kaas oo ku shaqaya madax-banaanida degamada dugsiga. Wixii macluumaad dheeraad ah ka wac YWCA a 614-224-9121 ext. 271 ama booqo bartooda www.ywcacolumbus.org